

Hadda dadka da'da ah waa ay balansan karaan waqti looga talaalo cudurka Karoonaha

Hadda dadka da'da waaweyn ee gobolka Kalmar wey is talaali karaan. Laakiin waa in ay waqti sameystaan. Ugu horeyn waxaa waqti samaysan kara dadka da'doodu tahay 77 jir iyo wixii ka weyn. Dhammaan dadka kale waa in ay sugaan.

Dhammaan dadka doonaya in ay iska talaalaan karoonaha (covid-19) waa in ay waqti qabsadaan. Laakiin hadda waxaa loo ogol yahay oo kaliya dadka da'doodu tahay 77 jir iyo wixii ka weyn in ay ballan samaystaan. Marka la talaalo kuwaas ayey kuwa kalena sameysanayaan waqti.

Waa wax fiican in aad is tallaasho

Markaad is tallaasho waxaad heleysaa difaac naftaada ah iyo difaac dadka kale ahba. Haddii dad badani is tallaalo, fiirusku ma helayo dad uu ku dhaco. Cudurka karoonahana wuu joogsanayaa. Markuu dhaco cudur faafa waa in qof walba qaybtiisa ka qaataa joojintiisa. Haddey in badani is tallaasho, si caadi ah baynu nolol maalmeedkeenii ugu soo laabanaynaa sideenii hore.

Sidan ayaad ku ogaan kartaa marka da'daada la soo gaadho.

Fiiri bogga1177.se. Halkaas ayaad ka heli doontaa da'da ku xigta ee ballan samaysan karaysa. Warbixintuna waxa ay ku qorantahay iswidhis.



Ku beeg/toosi kaamirada moobiilka kodka QR-ka.

Ama: Wac xaruntaada caafimaad oo weydii.



Ku beeg/toosi kaamirada moobiilka kodka QR-ka. Hoos u soco ilaa aad ka hesho xaruntaada caafimaadka.

Haddii aad heli weydo nambarka xaruntaada caafimaad:

Wac kan xarunta caafimaad ee gobolka oo ah 0480-84 000, ayagaa kuu gudbinaya xaruntaada caafimaad.

Sidan baad waqti u sameysan kartaa Haddii aad leedahay nambarka aqoonsiga (personnummer) oo aad afka iswidhishkana awoodid, waxaa habboon in aad gasho bogga 1177.se. oo aad waqti ka samaysatid. Uma baahnid in aad aqoonsiga bangiga-bank-id, leedahay si'aad ballan waqti u sameysato, raadso qof kaa caawiya. **Haddii aanad lahayn nambarka aqoonsiga (personnummer) ama aanad moobiilka ama kombiyuutarka ka samayn karin, waxaad u baahantahay in aad wacdo xaruntaada caafimaadka**

Gobolka waxaa uu soo diray warqad.

Adiga oo ah qof da'weyn waxaan filaynaa inaad heshay warqad gobolku soo diray oo af Iswidhish ku qoran. Waa warbixin talaalka ah. Waqradda meel dhigo, warsana qof luqadda yaqaanna inuu kaa caawiyo inaad balan samaysato.



Sidan baad waqti uga sameysankartaa moobiilka ama kombiyuutarka.

1. Gal bogga 1177.se-riix halka ay ku taal "Hitta vård" raadi magaca xarunta caafimaadkaada



Somaliska Soomaali
<https://bit.ly/3b2wPYJ>

Ku beeg/toosi kaamirada moobiilka kodka QR-ka.

(Haddii aad moobiil ka samaysanayso riix kodka QR ee xagga sare)

2. Riix xaga hoose meesha leh "Våra e-tjänster", haddana "Boka tid för vaccination mot covid-19."
 3. Dooro "Syfte för besök"-oo riix da'daada.
 4. Qof waa uu u sameyn karaa qof labaad- lamaane waa ay samaysan karaan haddii labadooduba yihiin 65 sano jir ama ka weyn yihiin..
 5. Kalenderka ka dalbo waqtigaad dooneyso inaad timaaddo.
 6. Buuxi "Personuppgifter" macluumaadkaada qofeed.
 7. Buuxi "Hälsodeklaration" macluumaadkaada caafimaad. Riix "Spara"
 8. Riix meesha leh "Bekräftelse av tid" iyo "Samtyck"
- DIGNIIN!** Ma isticmaali kartid bej furaha Internet Explorer si'aad waqti u sameysato.

Sidan baad u wici kartaa xaruntaada caafimaad si'aad waqti u sameysato

1. Wac xaruntaada caafimaad.
2. Marka lagaa qabto: riix **3** telefoonkaada.
3. U reeb fariin adigoo sheegaya magacaaga iyo telefoon nambarkaada.
4. Todobaad kadib bay kusoo wici doonaan oo aad ballan sameysankartaa. Fiiro gaar ah: TALAALKU WAA LACAG LA'AAN MARWALBA. Haddii qof ku soo waco oo uu ku dhaho lacag baad bixineysaa talaalka ama bangi nambarkaada (Bank Id) ku weydiyo, hala hadlin waa qof khiyaano watee. Isa saar telefoonka.

Xusuusnow: Haddii lagaa talaalay covid-19 uma baahnid inaad balan sameysato. Haddii aad qaadato daawada Waran la yiraahdo, waa in aad ballan samaysataa dhiiga lagaaga qaadayo todobaad ka hor inta aadan is tallaal.

Haddii aad heli weydo nambarka xaruntaada caafimaad:
Wac kan xarunta caafimaad ee gobolka oo ah 0480-84 000,
ayagaa kuu gudbinaya xaruntaada caafimaad.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.
Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhax dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar

BYT TILL
KOMMUN
LOGOTYP